War faafin

06 Oktoobar, 2022

# Soo jiidashada iyo tababridda kalkaalisooyinka caalamka

Si sare loogu qaado daryeelka caafimaadka, Alberta waxay u fududaynaysaa kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay in ay ka helaan rukhsadda shaqada kana shaqeeyaan gobolkeenna.

Waaxyaha Waxbarashada Heerka sare, Caafimaadka, iyo Shaqaalaha iyo Socdaalku waxay bilaabayaan qorshe saddex qaybood iskugu jira si ay gacan uga gaystaan yaraynta caqabadaha hortaagan kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay. Arrintan waxaa kamid ah ballaarinta barnaamijyada kor usoo qaadista xirfada kalkaalisooyinka iyo helista shaqada caafimaadka ayada oo la fududaynayo hannaanka sharciga lana abuurayo bar cusub oo onleen ah si kalkaalisooyinka caalamka wax ku bartay looga caawiyo in ay ka gudbaan hannaanka.

Waxbarashada Heerka sare(Advanced Education) waxay ku kharash garaynaysaa $3.5 milyan 2022-23 si ay u bilowdo ballaarinta fursadaha ay helayaan kalkaalisooyinka caalamka wax ku bartay.

Wakhti xaadirkaan, kalkaalisooyinka caalmaka wax ku bartay waxay wajahaan wakhtiyo sugitaan oo dhaadheer iyo kaalmada dhaqaalaha oo ku yar si ay u helaan sharciga oggolaanshaha shaqada ee Alberta. Qorshe habaysan oo wax looga qabanaayo caqabadahan, ayada oo wali la ilaalinaayo daryeelka tayada sare leh ee laga filaayo Alberta, ayaa si wanaagsan u taageeri doona baahiyaha degdegga ah iyo kuwa mustaqbalka ee hannaanka daryeelka caafimaadka gobolka.

“Alberta waa meesha ugu wanaagsan ee Canada looga noolaan karo, laga shaqayn karo caruurna lagu korsan karo. Waxaa jirta baahi aad u ballaaran oo dhanka shaqaalaha daryeelka caafimaadka ah. Qaabkan istiraatiijiyadda ah wuxuu gacan ka gaysan doonaa in la helo kalkaalisooyin xirfado sare iyo aqoon sare haysta oo si dhakhso ah ugu soo biira daryeelkeena caafimaadka annaga oo dunida xasuusinayna dhammaan faa’iidooyinka ku noolaanshaha Alberta.”

*Jason Kenney, Hoggaamiyaha*

## Xaqiijinta daryeel caafimaad oo tayo sare leh ayada oo la yaraynaayo caqabadaha ka hor imaanaya

Waxbarashada Heerka sare ah waxay kala shaqayn doontaa goobaha waxbarashada ee dugsiga sare ka dib sidii loo ballaarin lahaa tirada boosaska kajira barnaamijyada kor usoo qaadista xirfada horraanta Janaayo 2023. Barnaamijyada kor usoo qaadista xirfada ee cusub iyo deeqaha lagu taageerayo kalkaalisooyinka caalamka kale wax kusoo bartay ee raba in ay kalkaalisooyin ka noqdaa Alberta sidoo kale waa la diyaarin doonaa.

Barnaamijkanu wuxuu qayb ka yahay hindise dowladdu waddo oo ballaaran si loo xaqiijiyo in shakhsiyaadka u qalma in ay soo galaan xirfadaha la maamulo iyo shaqooyinka gaarka ah ama ganacsiyadu aysan la kulmin hannaan ama caqabado aan cadaalad ahayn. Arrintan waxaa kamid ah ka

gudbidda *Xeerka Habraaca Diiwaangalinta Cadaaladda ah*(*Fair Registration Practices Act)* iyo abuurista Xaafiiska Habraaca Diiwaangalinta Saxda ah.

“Kalkaalisooyin caalamka kale wax ku bartay oo aad u fara badan ayaan awoodin in ay qabtaan shaqooyin aan heerkooda xirfadeed udhignayn sababtoo ah kharashka iyo wakhtiga sugitaanka barnaamijyada kor usoo qaadista xirfada. Waxaanu meesha ka saaraynaa caqabadahaan waxaanna kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay ka caawinaynaa in ay ku shaqeeyaan xirfaddooda si ay kor ugu qaadaan naftooda iyo hannaankeenna daryeelka caafimaadka.”

*Demetrios Nicolaides, Wasiirka Waxbarashada Heerka sare*

“Howlaha sida ka gudbidda *Xeerka Habraacyada Diiwaangalinta Cadaaladda ah* iyo diyaarinta Cadaaladda Xaafiiska Dadka waddanka ku cusub waxa ay keenayaan isbaddal si xirfadleyaasha caalamka kale wax ku bartay looga caawiyo in ay si dhakhso ah uga shaqeeyaan gobolkeenna. Si kastaba ha noqotee, wali waxaa jira waxyaabo badan oo u baahan in la sameeyo. Tanina waa sababta aan ugu khasbannahay inayn qaadano dawladdu udhantahay si wax looga qabto caqabadahan ku gudban xirfaddaan.”

*Kaycee Madu, Wasiirka Shaqaalaha iyo Socdaalka*

“Hannaankeenna daryeelka caafimaadku wuxuu u baahan yahay kalkaalisooyin, kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay ee usoo haajira Canada-na waa isha ugu weyn ee aqoonta iyo xirfadda ee aan laga faa’iidaysan. Mount Royal University waxay ku faanaysaa in ay ka qaybqaadato ka kaalmaynta kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay in ay gutaan shaqadooda ku dheehan adkaysiga, go’aanka, dulqaadka, iyo si wacan ufahamsanaanta dhaqanka Alberta.”

*Tim Rahilly, madaxweynaha iyo ku xigeeka gudoomiyaha, Mount Royal University*

## Xaqiiqooyinka kooban

- Wakhti xaadirkaan, kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay waxay kala kulmaan caqabadaha soo socda gudaha Alberta:
    - Hannaan sharci oo wakhti dheer qaata (ilaa 24 bilood).
    - Wakhti sugitaan oo dheer si ay u helaan barnaamijyada kor usoo qaadista xirfada ee ka taageeraya kor u qaadista xirfadaha ee ay u baahan yihiin si ay u buuxiyaan xeerarka habraacyada kalkaalisada ee Alberta.
    - Jiritaan la’aanta boosas caafimaad si looga taageero dhammaystirka barnaamijyada kor usoo qaadista xirfada.
    - Kharashka aadka uqaaliga ah si ay u helaan sharciga shaqada Alberta (gaaraya ilaa $16,000-ka badan), oo ay la socoto jiritaan la’aanta kaalmada dhaqaale.
- Gobolada kale ee Canada, oo ay kujiraan British Columbia, Manitoba, Ontario, New Brunswick iyo Saskatchewan, waxay ay ku howlan yihiin qaabab hal abuur leh oo ay kusoo shaqaalaysiisanayaan kalkaalisooyinka caalamka kale wax ku bartay si ay u buuxiyaan baahiyaha dadweynahooda.

## Warbaahinta

- [Daawo war saxaafadeedka]